



## Lacag bixinta waalidka ee internetka

### Macluumaadka loogu talagalay xannaaneeyayaasha iyo waalidiinta

Waa u suurtagal waalidiinta hadda inay sameeyaan lacag bixin internetka ah dugsiga ee caddadka ardeyga lagu leeyahay, isagoo adeegsanaya bogga lacag bixinta nabdoon ee uu sameeyey Westpac. Lacag bixinta waxaa lagu sameyn karaa adoo isticmaalaya Visa ama MasterCard credit card ama debit card iyo ama waxaa laga bixin karaa kumbiyuutarka, tablet ama taleefanka gacanta. Bogga lacag bixinta waxaa laga isticmaalaa bogga koowaad ee website ka dugsiga adoo dooranaya \$ Make a payment (\$ lacag bixi).

Westpac wuxuu dhowaan hagaajiyey nidaamka si u siiyo wakhti badan in faahfaahinta la geliyo iyo in waalidiintu ay awoodaan inay lacagta bixiyaan iyagoo isticmaalaya doorashada si otomaatig isu buuxinaya, haddaba oo aan u baahan inay faahfaahintooda dib u geliyaan. Lacagaha hadda waxaa lagu bixin karaa adoo isticmaalaya a credit card ama si toos ah uga diraya xisaabta bangiga.

Waxyaalaha la bixin karo waxaa ka mid ah lacag bixinta dugsiga ee iskaaga ah, lacag bixinta maadada, fasaxyada maalin jooga ah, wax u iibinta ardeyda iyo fanka gacanta laga qabanayo iyo hal abuurida (tan waxaa ka mid ah koox, jilitaan iyo qoob ka ciyaarka).

Waxaa sidoo kale jira qayb la yiraahdo 'Kale' si ay u daboosho waxyaalaha aysan dabooleynin cinwaanadii hore, 'Kale' waxaa loo isticmaali karaa si loo sameeyo lacag bixin dhammeystiran ee Qoraalka Xisaabta Dugsiga.

Markaad hesho \$ Make a payment waa inaad gelisaa:

- ardeyga magaciisa
- fasalka
- taariikhda dhalashada

Faahfaahintaan waxaa la geliyaa maalin kasta oo aad lacag bixineyso maadaama ardeyga macluumaadkiisa aan lagu heyn nidaamka lacag bixinta.

Kani waa nidaam lacag bixin oo ammaan ah oo uu sameeyey Westpac si loo hubiyo in credit card kaagu ama debit card kaaga faahfaahintiisa loo qabtay si ammaan ah. Faahfaahintaan dugsiga dib looguma gudbiyo.

Waxaad awood u leedahay inaad jeegareyso oo aad bedesho wixii faahfaahin ah ee lacag bixinta ah ka hor intaan lacagta bixinteeda la sameyn. Warqada lacag qabashada iimeyl baa lagu soo diri karaa iyo/ama waa la daabici karaa.

Faahfaahinta lacagaha si joogta ah ayaa dugsiga loogu gudbiyaa halkaas oo la helayo laguna qorayo xisaabta ilmahaaga. Maadaama warqada lacag qabashada lagaa siiyeey bogga lacag bixinta warqad lacag qabasho oo dheeraad ah kuma siin doono dugsigu.

Wixii weydiimo ah oo khuseeya nidaamka lacag bixinta internetka ah fadlan la xiriiir Xafiiska Maamulka Dugsiga.

### Adeegga Turjumaanka Taleefanka

Haddii aad u baahan tahay in ingiriiska lagaa caawiyo si aad dugsiga ula xiriirto fadlan wac Adeegga Turjumaada Afka iyo Qoraalka 131 450, U sheeg luuqadaada rabto oo weydii xiriiriyaha inuu dugsiga kuu Waco. Xiriiriyaha ayaa khadka soo gelinaya turjumaan kaa caawiya wadahadalkaaga. Adeegana lacag lagaama qaadi doono.